

Soo koobida Fulinta Alki Point Healthy Street

Sahanka Alki Point Healthy Street wuxuu muujiyay in dadka intooda badan ay taageerayaan ka dhigista Waddooyinka Caafimaadka leh mid joogto ah. Waxa kale oo ku jirtay fikrado waxtar leh oo ku saabsan sida loo sii hagaajinayo. Soo koobidani waxa ay wadaagaysaa qodobbada ugu muhiimsan sahanka, kaas oo lahaa 1,199 jawaabo, iyo xog kale oo la ururiyay intii u dhaxaysay Xagaaga iyo Dayrta 2024.



NATIIJOOYINKA MUHIIMKA AH

Dareen badbaado iyo Soo dhawayn leh

- 71% dadku waxay sheegeen in ay ammaan ku dareemayaan Waddada Caafimaadka qabta.
- 57% ayaa sheegay in helista meesha socodka iyo baaskiilka ay ka dhigayso inay aad ugu dhowdahay inay booqdaan Alki Point.


Sida dadku u Isticmaalaan Waddada

- Dad badan ayaa ku lugeynaya, baaskiil ku wata, oo ku nasanaya Waddada Caafimaadka ee Alki Point marka loo eego waddooyinka la midka ah ee ay arkayaan maalinka oo dhan.
- Sababtoo ah baabuur badan ayaa isticmaalaya waddada, in la yeesho waddo gooni ah oo socod iyo baaskiil aad bay muhiim ugu tahay badbaadada.
- Baabuurtu waxay ku socdaan ilaa 2 mayl saacaddii si tartiib tartiib ah tan iyo markii ay wadadu iska bedeshay barnaamij tijaabo ah oo ay noqotay muuqaal joogto ah.


Arrimaha Baarkinka

- Baarkinka ayaa walaac weyn ku ah booqdayaal badan, dadka qaarna kuma qanacsana fursadaha hadda jira.
- Qiyaastii 2% dadku waxay yiraahdeen dhibaatooyinka baarkinka ama calaamado jahawareer leh ayaa ka horjoogsaday inay booqdaan. Kuwaas, in ka badan 70% ma ogayn meelaha baarkinka ee la cusboonaysiiyay ee u dhow.
- Meesha ugu caansan ee baarkinka ee u dhow Constellation Park (Beach Dr SW) waxay lahayd in ka badan 75% Boosas banaan intii daraasaddu socotay.

Dadka halkii mile ee isticmaala Waddada Caafimaadka qabta oo dhan



Dadka baaskiilka wata maalintii (celcelis ahaan 7 maalmood)



Seattle
Department of
Transportation

Sahanku wuxuu muujinayaa in dadku ay ku faraxsan yihiin waddada Caafimaadka ee Alki Point oo ay dareemayaan inay ammaan tahay oo ay fududahay in la isticmaalo. Laakiin meelaha qaar waxay u baahan yihiin horumar. Talooyinka caadiga ah waxaa ka mid ah hagaajinta baarkinka, ku darida calaamado ka sii wanaagsan, iyo hagaajinta kaabayaasha si loogu dhiirigeliyo dad badan inay isticmaalaan. Fikradaha sida balaarinta meelaha lugaynta iyo baaskiilka ama ku darista darbiyada waddooyinka ayaa sidoo kale ka dhigi kara booska mid ka sii wanaagsan. Waa kuwan qaar ka mid ah talooyinka ugu muhiimsan ee bulshadu soo jeedisay.

Soo jeedinta Bulshada ee Horumarinta



Waddada Fidi

Kordhi meesha socodka iyo baaskiilka ilaa dhamaadka Beach Dr SW.



Dejinta Gaadiidka & Isgoysyada

Ku dar tilaabooyinka Dejinta gaadiidka oo wanaaji isgoysyada dadka lugeynaya ee 63rd Ave SW.



Hawlaha Wadooyinka

Tixgeli inaad Beach Dr SW ka dhigto waddo hal jiho ah oo Baabuurta ah, oo leh meel Baabuurtu isku dhaafto si aad uga dhigto mid badbaado leh oo sahlan in lagu kaxeeyo.



Kobcinta

Ku dar dhir, kuraas, farshaxan, iyo waxqabadyo si aad aagga uga dhigto mid firfircoon oo soo dhawayn leh.



Hagaajinta Baarkinka

Ku dar meelo badan oo baabuurta la dhigto oo la heli karo ADA, aagagga rarka, iyo baarkinka muddada gaaban si loo caawiyo dhammaan booqdayaasha.



Waxaad ka heli kartaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan qiimayntayada boggayaga seattle.gov/transportation/projects-and-programs/programs/healthy-streets/alki-point-healthy-street. Warbixinta wacyigelinta iyo mareegta mashruucu waa Ingiriis oo keliya.

Ku sawir code-ka QR kamaradaada si aad u booqato shabakadayada mashruuca.